HELSIŃSKA FUNDACJA PRAW CZŁOWIEKA

# OGOW XUQUUQAHAAGA



## XOGTA KOOBAN EE KU SAABSAN CARRUURTA IYO DHALLINYARADA AAN LALA SOCON EE KU JIRA XARUN LAGU HAYO DADKA AJAANIBTA AH

Waxaa maalgeliyey Midowga Yurub. Aragtida iyo fikradaha lagu muujiyey waa kuwa qoraha/koolayaasha oo keliya, mana aha in ay si khasab ah u metelaan aragtida Midowga Yurub ama Hay'adda Fulinta ee Waxbarashada iyo Dhaqanka Yurub (EACEA).

## SIDEE AYUU XAALKAAGA SHARCIGU U EKAAN KARAA?

Waxaad isku aragtay inaad ku jirto Xarunta lagu hayo U soo tahriibo Poland xaaladaada sharcina wali waa mid la sugayo.
Warqadan daabacan ayaa kaa caawin doona inaad fahamto habraacyada sharci ee laga yaabo inay ku khuseeyaan.

**1** *Kiiskaaga waxaa laga yaabaa inuu jiro* **DACWADO KUGU QASBI DOONA INAAD KU LAABATO WADANKII AAD U DHALATAY**.
Haddii aad hesho go'aankan noocan oo kale ah, waa inaad ku noqotaa dalkaagi, waxaana laga yaabaa in lagu masaafuriyo.

Si kastaba ha ahaatee, waad khilaafi kartaa go'aanka. Xasuusnoow inaad haysato **7 MAALMOOD** inaad racfaan ka qaadato.

Haddii aadan rabin inaad ku laabato wadankaagi, ku raadso kaalmo sharci sida ugu dhakhsaha badan ama samee qormo inaad khilaafsan tahay go'aanka noocaas ah. Si faahfaahsan u sharax xaaladdaada, sababta aad uga soo tagtay dalkaaga iyo sababta aadan u doonayn inaad ku noqoto.



Haddii wadankaaga lagaaga hanjabay noloshaada ama caafimaadkaaga, dhibaato laguu geystay, dagaal ka socdo, aad ka tirsan tahay qolo diin haysata, qowmiyad ama jinsi laga tira badan yahay oo qatar ku jirta - waxaad cosan kartaa

**2** **MAGANGELYO CAALIMI AH.**



<u>Arintan ayaad samayn kartaa waqti kasta.</u>
La xidhiidh Ciidamada Ilaaliya Xuduudka.
Haddii aadan garanaynin sida midan loo sameeyo - bogga xiga waxaad ka heli doontaa linki ay ku qoran yihiin liiska ururada ku caawin kara.

Haddii aad tahay ilmo kaligiis imaaday Poland isla markaana aad codsatay magangelyada caalmig ah,
waa in lagaa soo daayaa xarunta dadka lagu hayo.
In laguu diido xuquuqdaa markaad codsatay magangelyo, waa sharci daro.

Markaad ka yartahay 18 sano,maxkamaddu waa inay kuu qabataa qareen gaar ah - masuul (PL *kurator*) - si uu kuu caawiyo ilaa aad ka gaarayso 18 sano.

Waxaa intaas kadib laga yaabaa in laguu gudbiyo xarun daryeel- taas waa meesha la geeyo caruurta aan cidna la soconin. Kadib weydiiso xogta aad kala xiriiri karto mas'uulkaaga. Qareenkaaga waxaa waajib ku ah inuu wax walba kuu sharaxo oo ku caawiyo. Gaar ahaan, waa inay joogaan dhagsiga kiiskaaga magangelyada.
Diyaarso dukumentiyada aad ku xaqiijinayso da'daada, sida nuqulka baasaboorkaada ama shahaadadaada dhalashada.
.


Haddii...

aad tahay ilmo
(aad ka yar tahay da'da 18 sano jir);

sababta aad u imaatay Poland ay
tahay inaad ka soo carartay wadankaadi;

aad imaatay adigoona aysan kula
soconin waalidkaa ama qof kaloo sharciyan
masuul kaa ah
tusaale ayeeyo ama awoowe, qaraabo;

## MARKAAS WARQADAN DAABACAN ADIGAA LAGUUGU TALAGALAY!




## MUDDO INTEE DHAN AYAAD JOOGI KARTAA XARUNTAN?

sida uu sharciga qabo:

## UGU BADNAAN 18 BILOOD

haddii aad codsatay magangalyada caalamiga ah walina aysan dhamaanin habraaca.;

## UGU BADNAAN 18 BILOOD

haddii aad heshay go'aank in dib laguugu celinayo wadankaaga masaafurintana aan la fulin.


## MAXAY YIHIIN FURSADAHA AAD HAYSATO MARKAAD KA BAXDO XARUNTA?

Poland jooga ilaa iyo inta uu ka soo afjarmayo kiiskaaga magangelyada caalamiga ah. This is important. Tani waa muhiim. Hadda ma haysatid dukumeentiyo aad Poland kaga baxdid. Sug ilaa kiiskaaga laga xalinayo.

Haddii aad ka tagto Poland, xaaladaada sharci way sii adkaan doontaa.
Tusaale ahaan, haddii aado waddan kale inta lagu jiro wakhtigan, mas'uuliyiinta dalkaas ayaa laga yaabaa inay dib kuugu soo celiyaan Poland.

Haddii qoyskaaga ku nool yihiin Poland ama wadan kale oo Yurub ah, xaqiiji inaad ogeysiiso xafiiska magangelyada : Xafiiska Ajaaniibta (PL *Urząd do Spraw Cudzoziemców*). Waxaad xaq u leedahay inaad u tagto, xafiisku waa inuu go'aan ka soo saaraa arrintan. Tus dukumentiyada caddaynaya inaad isku dhawdihiin.

Haddii, markaad ka baxdo xarunta dadka lagu hayo kadib, habraaca magangelyada caalamiga ah ay sii socono, waxaa lagu geyn doonaa xarun aad xor tahay oo ku taalo Dębak ama Biała Podlaska.




Kadib waxaa laguu wareejin doonaa xarun kale oo aad xor tahay ama waxaad heli kartaa lacag aad ku kireysato guri abaarto ah.

Haddii aadan raadsanaynin magangalyo caalami ah, markaa, nasiib daro, xaq uma lihid inaad hesho guri.

## CAAWIMO MA U BAAHAN TAHAY?

Haddii aadan fahmin waxa marka xiga dhacaya, ama aad u baahan tahay caawimaad sharci ama mid nafsi ah, halkan waxaa ku qoran xogta aad kala xiriiri karto ururada caawiya muhaajiriinta iyo dadka qaxootiga ah..

Ha dareemin ceeb marka raadso kaalmo:
https://www.gov.pl/web/udsc/organizacje-zajmujace-sie-udzielaniem-pomocy-cudzoziemcom

Haddii aadan haysan lacag aad ku qabsato qareen si uu kaaga caawiyo in lagaa fara maroojiyo xorriyadda, u qor codsi maxkamadeed si ay kuu siiso gaargaar sharci oo lacag la'aan ah. Qor inaadan awood u lahayn inaad qabsato qareen iyo in habraacyada sharcigu ay aad kugu adag yihiin.